




Leicestershire
Police

Protecting our communities

Macluumaad Dhibanaha Dembiga



Dembiga/dhacdada/
lambarka shilka:

Nooca falka dembiga

Sarkaalka soo xaadiraya

Sarkaalka baadhaya

Sarkaalka baadhaya
faahfaahinta xidhiidhka:

Taariikhda
ay dhacday:

Taariikhda laga
warbixiyay



Tusmadda



Hordhaca	3
Maxaad xaq u leedahay hoosta Lambarka Dhibaha?	4
Waa maxay Dhibanaha Marka Kowaad oo sideed ii caawin kartaa?	6
Hadda maxaa dhacaya oo aan ka warbixiyay dembiga?	7
Markaas maxaa ku dhici doonaa warbixinta markhaatiyada?	7
Kumaa arki doona warbixintayda markhaatiga?	7
Wax kaqabashada dembigaaga	8
Samaynta warbixinta gaarka ah ee dhibanaha (VPS)	9
Warbixinta Saamaynta Ganacsiga (BIS)	10
Maxkamadda miyaan tegayaa?	10
Talada ka hortagga dembiga iyo macluumaad dheeraad ah	11



Hordhaca

Booliska Leicestershire waxa uu ballan ku qaadayaa siinta adeeg muuqda dhibanayasha iyo markhaatiyada isagoo gaynaya wadnaha waxa aanu qabano.

Buug yarahan waxaa loogu talo galay inuu caawiyo dadka ay saamayso fahanka dembiga adeega ay bixiso in Leicester, Leicestershire iyo Rutland oo lagu dejiyay waxa aad ka filan karto booliska iyo kuwa kale ee shaqooyinkoodu ay yihiin inay adiga ku caawiyaan.

Waxaa jira heerar adeegyo maxali ah oo laguu heli karo dhexda geedka, adeega madaxa banaan iyo qarsoodiga loogu yeedho Dhibaha Marka Koowaad. Waxay caawiyaan dadka inay la tacaalaan oo ka bogsadaan dembiga haddii ay u baahdaan inay helaan macluumaad iyo talada telefoonka ah ama adeegyo khabiir dheeraada leh sida la talinta qof ilaa qof ah. Waxaad dooni kartaa inaad kala xidhiidho Dhibaha U horeeya hadda laakiin fadlan hayso buug yarahan xaalada ay dhacdo inaad jeclaato inaad sidaas samayso mustaqbalka.

Dhibanayaasha dembiga waxay leeyihiin 12 xuquuqood oo lagu dhigay Xeerka Dhaqanka qaranka loogu yeedho “Xeerka Dhibanaha” Kuwan waxaa ku jira xaqa lagu qoro macluumaad marka laga warbixinayo falka dembi, adeegyada iyo taageeradu ay ku habboonaadaan baahiyahaaga, macluumaadka ku saabsan waxa laga filayo Nidaamka Cadaalada Falka Dembiyeed iyo in lagu siiyo macluumaadka ku saabsan baadhitaanka iyo wax dacwad oogid suuragal ah.

Waxaanu ognahay noqoshada dhibane, ama markhaati, inay dhib lahaan karto oo wakhtiyada qaarkooda ay tahay dhacdo nolosha beddelaysa. Waxay ku saamayn kartaa dad kala duwan qaabab kala duwan.

Fadlan niyada ku dejiso inaanad la kulmay xaalad iskaa ah, waxaa jira dad ku caawin doona tallaaba kasta ilaa aad gaadho iyo macluumaadka buug yarahan way ku caawin doonaan adigu inaad garato wax badan oo ku saabsan waxa la bixinayo.

Waxaa sidoo kale jira [EasyRead](#) iyo [noocyo-18](#) hoose oo macluumaad ah oo loo heli karo dhibanayaasha.

Maxaad xaq u leedahay hoosta Lambarka Dhibaha?

Haddii aad tahay dhibanaha dembiga gudaha Ingriiska ama Wales waxaad xaq u leedahay taageerada ka timid wakaalada cadaalada falka dembiyeed si waafaqsan Xeerka Dhaqanka ee dhibanayaasha Dembiga haddii aad tahay shakhsi ama ganacsi, xataa haddii aanad ugu warbixin shilka booliska.



1 Si aad awood ugu yeelato inaad fahanto oo lagu fahmo.

Waxaad leedahay **Xaqa** in lagu siiyo macluumaad qaabka fudud si aadu fahanto oo lagu siiyo caawimada in lagu fahmo, ay ku jirto, halka lama huraanka ah, helida turjumaada iyo adeegyada turjumaada.



2 Si loo haysto faahfaahinta dembiga la diiwaangeliyay oon lahayd daahida aan loo cudur daarin.

Waxaad leedahay **Xaqa** aad ku haysato faahfaahinta dembiga uu duubay boolisku sida ugu dhakhsaha badan ka dib shilka. Haddii lagaaga baahdo inaad bixiso warbixinta markhaatiga ama in lagu waraysto, waxaa dleedahay **Xaqa** in lagu siiyo taageero dheeraad ah si ay kaaga caawiso adiga dhexda nidaamka.



3 In lagu siiyo macluumaadka marka laga warbixinayo dembiga.

Waxaad leedahay **Xaqa** aad ku hesho xaqiijinta qoran marka laga warbixinayo in lagu siiyo macluumaadka ku saabsan nidaamka cadaalada falka dembiyeed oo lagu sheego wax ku saabsan barnaamijyada ama adeegyada dhibanaha. Tan waxaa ku jiri kara adeegyada halka aan aad la kulmi karto qofka la tuhunsan yahay ama dambilaha, oo loo yaqaano sida Caddaalada Soo celinta ah.



4 In lagu guddiyo adeegyada dhibanayaasha taageerada iyo adeegyadu lagu habboonaysiiyay baahiyahaaga.

Waxaad leedahay **Xaqa** in lagu guddiyo adeegyada taageera dhibanayaasha, oo ay ku jiraan **Xaqa** loogula xidhiidho si toos ah iyaga, oo lagu qiimeeyo baahiyahaaga markaas adeegyada iyo taageerada waa lagu habboonaysiin karaa si ay u buuxiyaan baahiyahaaga. Haddii aad u qalanto, waxaad leedahay **Xaqa** in lagu siiyo guddinta adeegyada taageerada khabiirka iyo in lagu sheego taageerada dheeraadka ah xaga maxkamadda, tusale ahaan tallaabooyinka gaarka ah..



5 Si loo siiyo macluumaadka ku saabsan magdhowga.

Halka u qalanta, waxaad haysataa **Xaqa** in lagu sheego sida sheegashada magdhowga khasaare kasta, waxyeelo ama dhaawac sababay sidii natiijada dembiga.



6 In la siiyo Macluumaadka ku saabsan baadhitaanka iyo dacwad oogida

Waxaad leedahay **Xaqa** in lagu siiyo wararka cusub ee dacwadaada iyo in lagu sheego marka go'aamada muhiimka ah la qaato. . Waxaad sidoo kale haystaa **Right**, marxaladaha qaar nidaamka calaada ah, si aad u waydiiso go'aamada uu eegayo mar labbaad adeeg bixiyaha ku habboon.

Maxaad xaq u leedahay hoosta Lambarka Dhibaha?



7 Si loo sameeyo warbixinta gaarka ah ee dhibanaha (VPS)

Waxad haysataa **Xaqa** si loo sameeyo Warbixinta Gaarka ah ee Dhibanaha ah, taas oo u sheegto maxkamadda sida dembiga uu kuu saameeyay oo waxaa laga fekeraa marka la xukumayo dembiilaha. Waxaa lagu siin doonaa macluumaad ku saabsan nidaamka.



10 In la bixiyo kharashyada ioo hantida la soo celiyo.

Haddii lagaaga baahdo inaad soo xaadirta maxkamadda iyo caddaynta, waxaad leedahay **Xaqa** aad ku sheegato kharshyo gaar ah. Haddii wax hantidaada ah loo qaatay caddayn ahaan, waxaad leedahay **Xaqa** inaad soo noqoto sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.



8 In lagu siiyo macluumaad ku saabsan xukunka, nidaamka xukunka iyo doorkaaga markhaati ahaan

Haddii dacwadaadu ay gadho maxkamadda, waxaad leedahay **Xaqa** laguugu sheegayo wakhtiga, taariikhda iyo goobta dhegaysi kasta iyo natiijada kuwan dhegaysiga gudaha wakhti habboon.. Haddii lagaaga baahdo inaad caddayn bixiso, waxaad leedahay **Xaqa** in lagu siiyo caawimo habboon ka hor xukunka maxkamadda iyo, halka ay suuragal tahay, haddii maxkamaddu oggolaato, inaad la kullanto dacwad oogaha ka hor inta aanad caddayn bixin.



11 In la siiyo macluumaad ku saabsan dhibanaha ka dib marka dembiga lagu helo

Halka loo qalmo, waxaad leedahay **Xaqa** si toos ah laguugu gudbiyo Nidaamka Qandaraaska Dhibanaha, kaas oo ku siin doona macluumaadka ku saabsan dembiilaha iyo barnaamijkooda qof ahaan, iyo haddii/ marka ay u qalmaan ka fiirsashada siidayn kooban ama sii dayn buuxda. Marka ay habboon tahay, waxaad sidoo kale leedahay **Xaqa** aad ku samayso Warbixinta Gaarka ah ee Dhibanaha oo aad odhan karto sida dembigu uu kuu sii saamaynayo adiga.



9 In la siiyo macluumaad ku saabsan natiijada dacwada iyo rafcaano kasta.

Waxaad leedahay **Xaqa** in lagu sheego natiijada dacwada iyo, haddii eedaysanahu lagu heli dembi, in macluumaadka jumlada la siiyo.. Haddii dembiilaha uu rafcaan ka qaato xabsigooda ama xukunkooda, waxaad leedahay **Xaqa** in lagu sheego wax ku saabsan rafcaanka iyo natiijadiisa.



12 Si loo sameeyo cabasho ku saabsan Xuquuqdaada oo aan la buuxin.

Haddii aad rumaysan tahay inaanad helin **Xuquuqdaada**, waxad leedahay **Xaqa** aad ku samayso cabashada adeeg bixiyaha la xidhiidha.. Waad murugaysnayd, waxaad la xidhiidhi kartaa Baarlamaanka iyo caafimaadka Adeega u doodaha Qofka dulman.

Kuwan waa xuquuqda sharciga ah ee dhibanayaasha iyo markhaatiga lagu dejiyay sharciga Abriil 2021. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka faahfaahsan halkan: https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment_data/file/936239/victims-code-2020.pdf

Waa maxay Dhibanaha Marka Kowaad oo sideed ii caawin kartaa?



Sidii dhibanaha dembiga, boolisku waxay ku waydiin doonaan oggolaanshahaaga si ay ugu gudbiyaan macluumaadkaaga, iyo faahfaahinta xidhiidhka, Victim First kuwaas oo kula soo xidhiidhi doono adiga 48 gudahood. Tani waxay la samayn doontaa qayb "Qandaraaska Dhibanaha" kooxda baadhitaanka..

Dhibanahan adeegu hogaamiyo waxaa loogu talo galay si loo xaqiijiyo baahiyaha dhibanaha iyo markhaatiga in loo hormariyo oo laga fuudh yeelo marxalad kasta oo nidaamka cadaalada ah. Waa bilaasha, ka madax banaan booliska iyo kalsooni leh. Victim First waxay haystaa koox shaqaalaha kiiska xirfad yaqaano ah, oo ay taageerto kooxda u heelan oo si sare u tababaran, si looga caawiyo in la taageero dhibanayaasha dhexda safarkood soo kabashada.

Victim First waxay la shaqaysaan iyaddoo iskaashi la samaynaysa Booliska Leicestershire iyo wakaaladaha kale ee bixinaya taageerada, macluumaadka iyo hagitaanka dhammaan heerka ballaadhan ee aagaga. Adeega waxaa loo xilsaaray Xafiiska Booliska iyo Guddoomiya Dembiga oo waxaa gudbiya Catch22.

Victim First waxay bixisaa:

- Qof lagula hadlayo kalsooni (kullamo foolka fool ah xaga taageerada telefoonka)
- Macluumaadka iyo talada
- U doodista lala jiro booliska iyo ururada kale iyaddoo la matelayo dhibaha.
- Calaamada qoraalka ah ee khabiirka ururada
- Taageerada dhabta ah (adkaynta yoolka, digniinaha gaarka ah)
- Taageerada caafimaadka maskaxda (kalkaaliska caafimaadka maskaxdal gudaha guriga)
- Fududaynta cadaalada hagaajinta ah (Cadaalada hagaajinta ah waxay siiysaa dhibanayaasha fursada ay kula kulmaan ama kula xidhiidhaan dembiilayaasha si ay ugu sharaxaan dembiga -- waxay awood siisaa dhibanayaasha iyaddoo siisa iyaga codka. sidoo kale waxay haysaa dembiilayaasha in lagula xisaabtamo waxa ay sameeyeen oo waxay ka caawisaa iyaga inay qaadaan masuuliyada oo ay wax hagaajiyaan)

Waxaad soo waci kartaa Victim First haddii dembigu uu cusub yahay ama xili hore yahay. Way ku taageeri doonaan xataa haddii aad doorato inaanad uga warbixin shilka booliska.

Victim First Laynka caawimada
0800 953 95 95

Iimayl: support@victimfirst.pnn.gov.uk

Onlayn ah: www.victimfirst.org

Haddii aad ahayd dhibanaha rabshada falka dembiga ama dembigaaga uu ku lug leeyahay dhaawac, khasaare ama waxyeelo, waxaad u qalmi kartaa magdhowga ka yimid Masuuliyiinta Magdhowga Dhaawacyada Falka Dembiyeed (CICA). Waxaad codsan kartaa magdhowga haddii qof lagu qaaday dembi ama aan lagu qaadin. Si aad wax badan u gaato, booqo: www.cica.gov.uk ama ka soo wac CICA lambarka 03000 033601.

Waxaad ubaahan doontaa faahfaahinta saxda ah ee dhaawaca, waxyeelada ama khasaaraha iyo haysashada risiidhada la xidhiidha markaas magdhow waa la sheegan karaa.

xidhiidhada kale ee muhiimka ah

Talada Muwaadiniinta

www.citizensadvice.org.uk

Crimestoppers

www.crimestoppers-uk.org 0800 555 111

Her Majesty's Court's and Tribunal Service

www.gov.uk/going-to-court-victim-witness

Adeega Dacwad oogida Madaxtooyada (Crown Prosecution Service)

www.cps.gov.uk 0116 204 6700

Booliska Leicestershire Qaybta Daryeelka Markhaatiga

Witness.CareUnit@leicestershire.pnn.police.uk ama soo wac 101, waydii Leicestershire Police Witness Care Unit (Qaybta daryeelka Markhaatiga Booliska Leicestershire)

Neighbourhood Link – Ku biir nidaamka dirista fariimahayaga bulshadda si aad u hesho iimaylo jooqta ah oo ku saabsan waxa ka dhacaya aagaaga www.neighbourhoodlink.co.uk

Hadda maxaa dhacaya I oo aan ka warbixiyay dembiga?

Waxaa lagu waydiin doonaa inaad bixiso faahfaahin dheeraad oo ku saabsan waxa dhacay markaas booliska waxa dhici karta inay ogaadaan haddii ay jirto macluumaad ku filan oo la heli karo si loo bilaabo baadhitaanka falka dembiyeed. Haddii aanay jirin macluumaad ku filan, ama go'aanka mar dambe la gaadhay si loo xidho baadhitaanka falka dembiyeed adigoo qaadin wax tallaabo dheeraad ah, waxaa lagu sheegi doonaa sababta.

Dembigaaga waxaa wax ka qaban doona sarkaal baadhe ah kaas oo raadin doona si uu u helo caddayn taageeraysa dacwad oogid suuragal ah, ama habbayn dibada maxkamadda ka ah, wixii ah kuwan ka masuulka ah dembigaaga. Caddaynta waxaa ka mid ahaan kara qoraalka baadhida dembiga; warbixinaha markhaatiga/caddaynta laga duubay fiidyaha, waydiimaha guri ilaa guri ah iyo fiidyaha kamarada CCTV (iyo waxyaabo kale)

Sarkaalka baadhayay waxa uu aqbali doonaa inuu kula socod siiyo ugu yaraan 28 maalmood oo kasta qaabkaaga aad doorbidayso ee xidhiidhka. Waxaad codsan kartaa wararka u dambeeya ee caadiga ah.

Xafiiska sidoo kale waxa uu kaala hadli doonaa adiga haddii rafcaanka saxaafada bulshadda iyo/ ama saxaafada bulshaada ay ku caawin karto in la helo markhaatiyada kale ama rafcaan laga qaato wixii ah macluumaadka caawin kara baadhitaanka.; Haddii tani ay noqoto xaalada, faahfaahintaada gaarka lama shaacin doono. Rafcaanka lama soo saaro dhammaan dembiyada:

Dhibanayaasha nugul iyo kuwa la baqdin geliyo iyo markhaatiyada waxaa jira tallaabooyin gaar ah oo la diyaarin karo si loo taageero adiga inay ku siiyaan caddayn.

Markaas maxaa ku dhici doona warbixintayda markhaatiga?

Bayaan jeedinta, ama bixinta dhacdada fiidyaha duuban, waxaad caawinaysaa baadhitaanka kuwaas oo kugu caawin doono inay dembiilayaasha hadda la hor keenaan.

Haddii qof la tuhunsan yahay lagu soo eedeeyo dembi waxaa lagu waydiin karaa inaad soo xaadiro si aadu bixiso caddaynta. Haddii warbixintaada ay aqbalaan CPS oo difaacu markaa waxa dhici karta inuu doorto inuu ku tiirsanaado keligii warbixintaada oo laguma waydiin doono inaad tagto maxkamadda.

Si loo caawiyo boolisku inay baadhaan dembigaaga waa inaad u sheegtaa iyaga.

- Haddii aad xusuusan tahay shay aan hadda ka hor lagu darin warbixin kasta oo aad bixiso.
- Haddii ay faahfaahintaada xidhiidhku isbeddesho

- Haddii dembiga uu ku lug leeyahay nooc kasta oo cadaawad ah, tusaale ahaan haddii yoolka lagu saaray sababtoo ah isirkaaga, sinjiga, diinta, naafanimada ama aqoonsiga sinjiga, ama loo arkay isirka, galmada, diinta, naafanimada ama aqoonsiga sinjiga.
- Haddii aad qabto baahiyaha gaar ah, tusaale ahaan, dhaqaaqa, wada xidhiidhka ama shuruudaha diinta.

Kumaa arki doonaa warbixintayda markhaatiga?

Qof kasta oo ku lug leh dacwada waxay arki doonaa warbixintaada /caddayntaada, markaas waxaad bixin doontaa warbixinta faahfaahintaada gaarka ah waa la hayn doonaa. Markaad bixiso warbixin fadlan haku darin macluumaadka gaarka ah, iyaddoo la xidhiidha duruufaha shilka mooyaane. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan bixinta warbixinta markhaatiga waxaa laga heli karaa; www.gov.uk/government/publications/the-new-leaflet-giving-a-witness-statement-to-the-police-what-happens-next



Wax kaqabashada dembigaaga

Muddada baadhitaanka, haddii qof la xidho waa la waraysan karaa oo go'aan ayaa la gaadhi doonaa ku saabsan waxa ku dhici doona iyaga.

Iyaddoo ku xidhan dembiga, go'aankan ayaa ay gaadhaan miduun booliska ama Adeega Dacwad oogida Boqortooyada.

Waxaa jira dhowr qaab oo dembiilahu loola macaamili karo oo ay ku jiraan:

- in la soo dacweeyo ama loo yeedho oo lakeeno maxkamadda horteeda ama looga baahdo inay soo xaadiraan maxkamadda
- in la hoos keeno habbaynta maxkamaddal sida digniin
- gudashada xalka bulshadda ama cadaalada hagaajinta ah
- in la sii daayo iyaddoon jirin wax tallaabo dheeraada ah.

Haddii aanad ku farax sanayn go'aanka in dacwad lagu soo oogo, waxaad xaq u yeelan kartaa Mashruuca Xaqa Qiimaynta Dhibanayaasha (VRR)

www.leics.police.uk/advice/advice-and-information/acr/vrr/victims-right-review-scheme/

Haddii qof lagu soo eedeeyo ama loo yeedho oo loo diro maxkamadda, waanu kula soo xidhiidhaynaa oo waxaan kuu soo sheegaynaa maalinta koowaad ee maxkamadda oo waxaan kuu sharaxaynaa nidaamka. Haddii ka dib dhegaysiga koowaad ay jirtay dembi la qirtay waanu kuu soo sheegi doonaa natiijada.

Haddii anaay jirin qirashada dembiga ee eedayanaha, Qaybta Daryeelka Markhaatiga ee Booliska Leicestershire ayaa kula soo xidhiidhi doona ka dib taariikhda maxkamadda u horaysa. Way kula socod siin doonaan adiga macluumaadka lama huraanka ah iyo taageerada dhabta ah haddii loo baahdo inaad soo xaadiro maxkamadda si aad u bixiso caddayn oo ku soo gudbiyaan, oggolaanshahaagana ururka kale ayaa awoodi kara inuu ku siiyo noocyada kale ee taageerada.

Haddii dacwadaada loo diray Maxkamadda Boqortooyada dhegaysi dheeraad ah, Qaybta Daryeelka Markhaariga waxay kula joogtayn doontaa xidhiidh adiga oo waxay ku siin doontaa wararka cusub iyo taageerada la barbar ah Dhaqanka Xeerka Dhibanaha.

Waa muhiim inaad la xidhiidho Qaybta Daryeelka Markhaatiga haddii faahfaahintaada xidhiidhku isbeddesho.

Samaynta warbixinta gaarka ah ee dhibanaha (VPS)

Warbixinta Gaarka ah ee Dhibanaha (VPS) way qoran tahay ama waa warbixin duuban oo ku sharaxaysa eraydaada, sida dembiga kuu saameeyay, jidh ahaan, dareen ahaan, maaliyada ahaan ama qaab kale oo kasta.

VSP waxaa ka fekera garsooraha ama qaadiga marka la go'aaminayo waxay tahay xukunka eedaysanaha uu qaadanyo oo sidoo kale ka caawin karo adeeg bixiyayaasha inay ka fekeraan taageerada dheeraadka ah ee adiga iyo / ama qoyskaagu u baahan karo.

Si lagaaga caawiyo inaad go'aan ka gaadho haddii aad rabto inaad samayso VPS, waxaad leedahay xaqa inuu ku siiyo macluumaad ku saabsan nidaamka VPS boolisku marka laga warbixinayo dembiga. Haddii aad go'aan ku gaadho inaad samayso VPS, waxaa lagu waydiin doonaa haddii aad jeclaan lahayd inaad akhrido warbixintaada si cod dheer gudaha maxkamadda ama in lagu akhriyo iyaddoo lagu metelayo. Waxaad codsan kartaa nuqulka ka yimid booliska oo waxaa lagu siin doonaa fursada inaad samayso warbixin gaar ah oo dheeraad ah si loo muujiyo saamaynta isbeddelka dembiga., Waa inaanad akhriyin VPS gaaga laftaadu ama waa inuu kuu akhriyo isagoo ku metelaya. Waxaad beddeli kartaa maskaxdaada. VSP gaagu waxaa ka fekeri doona garsooraha ama qaadiga qaab isku mid ah, haddii la akhriyo ama aan la akhriyin (ama la daaray) si cod dheer gudaha maxkamadda.


Dhammaan dhibanayaasha waxay xaq u leeyihiin inay sameeyaan VPS haddii ay rabaan inay sidaas sameeyaan..

Haddii aad ka tiiraanyaysan tahay qaraabo dhow, waxaad lahaan kartaa xaqa aad ku samayso VPS iyo xaqa aad ku haysato qof kula socda adiga marka aad sidaas samaynayso.

Haddii dacwaysanahu qirto dembiga, ama lagu heli dembi, oo aad waydiisatay in warbixintaada si cod dheer loo akhriyo (ama loo daaro) gudaha maxkamadda, garsooraha ama qaadiga waxa uu go'aan ka gaadhi doonaa haddii iyo waxay tahay qaybaha warbixintaada gaarka ah oo si cod dheer loo akhriyi doono (ama loo daari), iyo cida akhriyi doonta. Garsooraha ama qaadiga had iyo jeer waxay ku xisaabtami doontaa dookhaaga marka go'aanka la gaadhayo, iyaddoo ay jiraan sabab wanaagsan inaan sidaas la samayn mooyaane. Qaybta Daryeelka Markhaatiga waxay kuu oggolaan doontaa go'aanka garsooraha ama qaadiga.

Garsooraha ama qaadiga waxa uu ka fekeri doonaa VPS kaaga iyo heerka waxyeelada uu kuu gaystay dembigi, oo ay la socoto caddayn kale.

Macluumaadka dheeraadka ah, booqo www.gov.uk/government/publications/victim-personal-statement



Warbixinta Saamaynta Ganacsiga (BIS)

Xeerka dhibanahu sidoo kale waxa uu xaq u siiyaa adiga inaad samayso warbixin dheeraad ah inay saamayso haddii ganacsigaaga ama mashruuca (sida deeqda) ay ahayd dhibanaha falka dembi.

Warbixinta Saamaynta Ganacsiga waxay kuu oggolaataa inaad faahfaahiso sida dembiga uu u saameeyay ganacsigaaga marka la eego saamaynta dhaqaalaha tooska ah (hantida la xaday ama la waxyeelleeyay). saamaynta dhaqaalaha aan tooska ahayn (waayida dhaqanka, waayida wakhtiga shaqaalaha,) iyo waxyeelada aan maaliyada ahayn sida sumcad luminta.

Maxkamadda miyaan tegayaa?

Waa muhiim in la sheego qodobkan in dhacdada aadku qalabaysan tahay inaad tagto maxkamadda, waxaa lagu siin doonaa taageerada dhexda Booliska Leicestershire, Qaybta Daryeelka Markhaatiga iyo Victim First t, haddii la codsado.

Haddii eedaysanaha dacwad dembi lagu soo oogo waxaa lagu waydiin karaa inaad soo xaadiro maxkamadda si aad caddayn u bixiso, si kastaba ha ahaatee, haddii warbixintaada ay aqbaleen Crown Prosecution Service (CPS) oo difaaca, uu yahay dhacdo ku filan oo buuxda, markaa waxay dooran karaan inay ku tiirsadaan keliya warbixintaada.

Keliya waxaad tegaysaa maxkamadda haddii eedaysanahu:

- uu dafiro eedaynta oo ma qirto dembiga
- qirtaa dembiga laakiin dafiraa qaybta muhiim ah ee dembiga oo saamayn kara nooca xukunka isaga ama iyaddu helo

Haddii lagaaga baahdo waxaad tegi kartaa maxkamadda, dacwad oogida oo qareenada difaaca waxay ku waydiin doonaan su'aalo ku saabsan caddaynta. Waxaad awood u yeelan doonta inaad akhrido warbixinta si aad u cusboonaysiiso xusuustaada marka koowaad.

Haddii lagu siiyay warbixin oo ka dib lagu waydiisto inaad maxkamadda tagto ama in lagu siiyo caddaynta, waa inaad sidaas samaysaa maadaama ay tahay tani shuruud sharci ah. Haddii lagu waydiiyo inaad maxkamadda tagto, waxaa lagu soo diri doonaa warqad kuu sheegaysa goorta iyo halka la tagayo iyo warsidaha sharaxaya.

Gaawimo dheeraad ah waxaa loo heli karaa si loo taageero markhaatiyaasha nugul ama la baqdin geliyay. Qaybta Daryeelka markhaatiga, Adeega markhaatiga, booliska ama CPS waxay kuu sheegi doonaan waxay tahay nooca caawimada la heli karo. Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan in la noqdo markhaati waxaa laga heli karaa www.cjsonline.org/witness ama www.cjsonline.org/victims dhibanayaasha dembiga.

Sidii qayb baadhitaanka hore, kooxdu waxay ku qiimayn doontaa dacwadaada aragtida si loo diyaariyo shuruudo gaar ah oo dheeraad ah (sida shaashadaha), kuwaas oo laga codsan karo si ay kuu siiyaan kalsooni dheeraad ah oo ah bixinta caddaynta. Qiimaynta waa la dhammaystiri karaa marxalad aad u hoosaysa wixii ah codsiga la samaynayo maxkamadda horteeda. Waanu ognahay in tani inta badan ay tahay baqdin dhab ah oo dembiga ah, laakiin waxaanu ku marin doonaa nidaamyada maxkamadda si wada jir.

Talada ka hortagga dembiga iyo macluumaad dheeraad ah



Waxaanu fahamnay in noqoshada dhibanaha dembi ay kaaga tegi karto dareen kaaga mid nugul. Victim First halkaas ayay kuu joogtaa haddii aad uga baahato iyaga taageero iyo talo bilaash ah oo madax banaan oo ku saabsan baadhitaanka iyo nidaamka cadaalada falka dembi.

Waxaa jira qaabab kaas oo aad kaga dhigi karto naftaada inaad dareento badbaado addoo qaadaya dhowr tallaalo oo amni oo fudud oo si feejigan uga fekeraya wax ku saabsan macluumaadka aad soo geliso onlaynka.

Waxaa jira ka hortagga dembiga oo badan oo aad u faa'iido leh talada ku saabsan Leicestershire websaydka Booliska www.leics.police.uk/cp

Sidoo kale waad ku biiri kartaa bulshaddayada nidaamka fariin dirida loogu yeedho Neighbourhood Link www.neighbourhoodlink.co.uk. Tani waxay awood kuu soon doonaa inaad hesho macluumaad iyo talo ka timid booliska oo waxaad faallo celin ka samayn kartaa ahmiyadaha booliska maxaliga ah.

 [@LeicsPolice](https://twitter.com/LeicsPolice)

 [Booliska Leicestershire](https://www.facebook.com/LeicestershirePolice)

 [leicestershire_police](https://www.instagram.com/leicestershire_police)

www.leics.police.uk

Fiirooyinka/ Su'aalaha dheeraadka ah: